State Government Victoria
Department of Education and Early Childhood Development

Literacy tips to help your child
Years 3–6
Somali


# Nasteexooyinka Akhris-qoraalka si loo caawiyo ilmahaaga

**Sannadka 3aad – 6aad**

Ilmo kasta ha helo fursad kasta










Qoysasku waa samaynta kowaad oo ugu badan xagga koritaanka ilmaha waxayna qayb muhiim ah ka qaadataa waxbarashada ilmaha.

Waxaa jira siyaabo badan aad u horumarin karto aadna u taageeri karto xirfadaha hadalka, dhagaysiga, aqriska iyo qoraalka oo uu ku baranayo asagoo cayaaraya iyo nashaadyada qoyska ee maalin kasta.

Buug-yarahan wuxuu bixinayaa naseexooyinka kuwaas oo adiga, ama xubnaha qoyska ee kale, aad la samayn karto ilmahaaga nashaadyada maalin kasta si aad u horumariso xirfadahooda akhris-qoraalka.

Waxtar weyn bay u noqon kartaa inaad ilmahaaga ka qaybgeliso nashaadyadan oo kale luqaddooda kowaad, iyo Ingiriisiga haddii aad ku hadli karto.

Qaybta elaktarooniga ee buug-yarahan waxaa lagu heli karaa Ingiriisiga iyo 23 luqadood oo kala duwan kuwaas oo qoysasku Iskaashato ka yihiin website-ka Wax-baridda: **www.education.vic.gov.au/about/directions/familiesaspartners/schools/connecting.htm**

## Halkee baan caawimaad ka heli karaa?

### Na Fa i a Saya

Macalinka ilmahaagu wuxuu talooyin kaa siin karaa sidaad u caawin lahayd xirfadaha akhris-qoraalka ee ilmahaaga. Mowduucyada qaarkood waxaad kala hadli kartaa macalinka kuwaas oo ay ka midka yihiin:

- Heerka wax-qabadka ilmahaaga ee hgowlaha akhris-qoraalka.
- Hadafyada uu ilmahaagu u shaqaynayo inuu ka gaaro xagga akhris-qoraalka, iyo sida aad u taageeri karto ilmahaaga inuu arimahaas gaaro.
- Xeeladaha aad isticmaali karto si aad ilmahaaga u caawiso xagga meelaha ku adag asaga ama ayada.

### Qalabyada Intarneedka

Website-ka cusub new *Connect-Primary* ee Dowladda Victoria ayaa sahla si aad ula xiriirto qalabyada wax-barasho ee kombiyuutarkaaga guriga, kombiyuutarka maktabadda degaanka, ama dugsigaaga.

Ka eeg Website-ka *Connect-Primary* website oo ah: **http://www.education.vic.gov.au/primary**

Website-ka *Connect-Primary* waxaa hubiyey macalimiinta si loo hubiyo inuu ku habboon yahay inay isticmaali karaan carruurtu.

Xusuuso, hadda aad gasho website-yada kale aan ku qornayn Website-ka *Connect-Primary*, xagga ammaanka darteed, waa inaadan intarneedka ku siin faahfaahinta shaqsigaaga, sida magacaaga ama magaca ilmahaaga oo dhammaystiran, dugsiga, lambarka taleefanka ama cinwaanka cid kasta oo aadan garanayn.

*Ultranet* waa nadaam intarneed ah oo cusub kaas oo ku siin kara macluumaadka ku saabsan wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga. Waa website dowlad-goboleedka oo dhan ah, ammaan ah kaas oo ardayda oo dhan, waalidiinta iyo macalimiintuba ay ka heli karaan intarneedka. Ka eeg website-ka *Ultranet* oo ah: **www.education.vic.gov.au/about/directions/ultranet/benefits/parents.htm**

# Ka caawinta ilmahaaga akhriska, qorida iyo daawashada

## Ka abuur guriga fursado wax akhris iyo qoris:

Maadaama akhriyayaashu, qoraayaashu iyo carruurtuba ay ka sahamiyaan aduunkooda maalin kasta wax sii dhaafsiisan guriga iyo dugsiga.

Waa muhiim inaad:



- Tus xiiso muhiim ah ee akhriska ilmahaaga iyo qoritaanka iyo eegida dhammaan noocyada kala duwan ee qoraalka.
- Ha kugu arkeen adoo wax akhrinaya qoraya una sheeg sababtaad wax u akhrineysid ama u qoreysid.
- Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan fahamkooda kuna dhiirigeli dadaalkooda wax akhris iyo qorista.
- La wadaag taariikhaha qoyska iyo sheekooyinka adoo la hadlaya kuna dhiirigeli ilmahaagu inuu la hadlo xubnaha qoyska ee waa weyn.
- Kala hadal bandhigyada telefishinka ama filimada aad wada daawateen.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inay sameystaan maktabadooda buuggaagta.
- Ka hadal dhacdooyinka aduunka, ku dhiirigeli ilmahaaga inuu eego dhinacyada kala duwan ee sheekada si ay u sameeyaan fikerkooda.

## Ku taageerida guriga akhriska iyo qorista ilmahaaga

**Abuur wakhti** waxbarasho oo joogta ah siina waxyaalo kicinaya qoraalka:



- Buug yar oo ay ku qoraan dareenkooda iyo fikradahooda.
- Kumbiyuutar iyo/ama buugta interneetka
- Qalinka sawirka, qalin qoriyo, qalimaanta midabka iyo qalimaanta caadiga ah.
- Qaamuusyo iyo buugta micnaha badan ka bixiya kelmada tixraac ahaan. Kuwan waxay noqon karaan buug ama kuwo laga helay interneetka.
- Macluumaadka interneetka sida khariiradaha, encyclopaedias, boggaga hawada.

### La wadaag fikradaha ku saabsan qoraalada



Ka dib marka ilmahaagu uu akhriyo qoraal, ku dhiirigeli isaga ama iyada inay ka hadlaan qoraalka.

Halkan waxaa ah waxooga fikrado ah oo laga yaabo inay ku haboon yihiin xiisaha ilmahaaga:

- Akhri wax ku saabsan qoraaga ama farshaxanlaha website-kooda.
- Raadi oo akhri sheeko kale oo uu qoray isku qoraa.
- Raac awaamiirta qoraalka si aad u abuurto wax, tusaale, sida cunto loo sameeyo, sameynta tusaale, warqad laabida. Iskuday origami ( warqad laabida Japanese ka). Ka eeg xiriirkan ah **http://www.origami.com/index.html** wixii tusaalayaal ah iyo awiimiirba.
- Sawir ama rinjiyeeye sawirada ku saabsan meelaha ama dadka jilaya sheekada. Ku sawir kuwan interneetka adoo gujinaya xiriirka Sawir ee website ka *FUSE* ku yaal ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Akhri dhawr qormo oo kuwa saabsan isku arin si aad u hesho wax ka badan hal fikrad. Ka hadal fikradaha kala duwan ee la sheegay.
- Fiirso filim ku salaysan buug ka dibna samee isbarbar dhigid.
- U dooro muuqaalo jilayaasha ama samee adoo gujinaya xiriirka Muuqalada ee ku yaal website ka *FUSE* ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.

## Weydiinta ilmahaaga su'aalo

Adoo weydiinaya su'aalo waxaad taageeri kartaa ilmahaaga inuu:

- La wadaago ka helidooda akhriska iyo qoraalka.
- Horumariyo faham ka fiican oo ku saabsan jilayaasha ama mowduucyada.
- Horumariyo dareen aad la qaybsaneyso kuwa kale xaaladooda.
- Horumariyo waxyaalaha ay qiimeeyaan, dareenkooda iyo waxay ka rumeysan yihiin ee ku saabsan aduunka.
- Balaadhiyo khibradooda iyo aqoontooda aduunka.
- Koriyo fekerkooda
- Tixgeliyo qodobada muhiimka ah ee waxay akhrinayaan.

Kuwani waa noocyada su'aalaha ee ilmahaaga laga yaabo in lagu weydiiyo dugsiga. Waxaad ku dari kartaa qaar ka mid ah su'aalahan markaad ka hadlayso waxyaalaha ku saabsan guriga wax ku akhrinta xitaa.

- Maxay ahaayeen magacyada jilayaasha sheekadu?
- Muxuu ahaa meesha ay joogaan?
- Muxuu sameeyey jilaagu intaa ka dib?
- Maxaa dhacay bilowga/dhammaadka qoraalka?
- Sidee baad u maleynaysaa inuu dareemayey jilaagu?
- Sidee baad ku bedeli lahayd dhammaadka?
- Sidee baad u sharxi lahayd isbedelada jilaha/meesha?
- Sidee bay kula yahay fariinta ugu weyn ee sheekada ku jirta?
- Ma la xiriirin kartaa dhacdo ama arin kale?
- Ma ku raacday fikradaha qoraaga?
- Waa maxay fekerkaaga fariinta ku saabsan sheekada?
- Sidee bay dadka kale ugu arki karaan si kaduwan?

## Ka shaqeynta erayada adag



Waa muhiim inaad siiso ilmahaaga wakhti iyo istiraatijiyado uu ku akhriyo ama qoro wixii ah erayo dhaadheer ama uusan aqoon.

Ka hor intaadan u sheegin ilmahaaga ereyga marka isaga ama iyadu ay akhrinayaan, iskuday xusuusintaan:

- Ka raadi waxyaalo kuu sheegaya micnaha erayga jumlada dhexdeeda.
- U eeg erayga aad. Ma u egyahay eray kale oo aad taqaan?
- Ma u jejebin kartaa erayga qaybo yar yar?
- Ma ku caawinayaan erayada ka horeeya ama ka danbeeya eraygan?

Ka hor intaadan u higaadin eray ilmahaaga marka isaga ama iyadu ay wax qorayaan, iskuday inaad weydiiso:

- Sax ma u egtahay?

**Ku dhiirageli ilmahaagu inuu wax akhriyo, qoro ama** uu wax daawado isagoo ujeedo khaas ah maskaxda ku haya. Fikradaha qaarkood waxaa ka mid ah:

- Akhri buug ama qoraal dib u eegid filim adoo gujinaya xiriirka Dib u eegida ee ku yaal website *FUSE* ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe ka dibna waxay ku dari karaan dib u eegidooda
- Akhri, ururi, ku tijaabi, qorna sida cuntada loo sameeyo si aad u sameyso buugga cuntada.
- Raadi waxyaalo xaqiiq ah oo ku saabsan aduunka adoo gujinaya xiriirka raadi ee ku yaal website ka *FUSE* ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Isticmaal fariinsiin islamarkiiba ah si aad ula wada xiriirto saaxiibo iyo qoysba.
- Hafid xusuus qor uu ilmahaagu ku qorayo dhacdooyinka iyo dareemada iwm.
- Samee oo qor kaadhadhka salaamaha.
- Qor liiska wax soo gadashada ee cunto karin aad adiga iyo ilmahaagu dooneysaan inaad sameysaan.



- Iska duub fiidiyow adigu dib-u-eegidaada isticmaalida kamarada interneetka, ama shaqada filimka ee kamarada dhijitaalka ah ama taleefanka gacanta. Eeg fiidiyowyo kale oo ay sameeyeen carruur adoo gujinaya xiriirka Daawashada ee website ka *FUSE* ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Ku biir Wiki si aad wax u akhrisid oo aadna uga qayb qaadatid.

## Mashruucyada Qoyska

Qaado fursada aad kaga qaybgelinayso qoyska oo dhan wax akhriska iyo qorista. Qaar ka mid mashruucyada qoyska waxaa ka mid noqon kara:

- Email u dirida xubnaha qoyska iyo saaxiibada.
- Iyadoo la isticmaalayo boggaga network-ga bulshada si aad ula xiriirto qoyska iyo saaxiibada.
- Wada akhrinta buug taxane ah
- Wada akhrinta awaamiirta shey cusub si loo ogaado siduu u shaqeeyo.
- Ku duubida dhacdooyinka qoyska ama khibradaha safarka joornaal ama bog interneetka



- Qoritaanka riwaayado iyo u jilidooda qoyska iyo saaxiibada
- Wada xalinta xujooyinka, hal xiraalayaasha erayada ah, maskax foorjeeyaha, ciyaarida cayaaraha erayada iyo kediska
- Wada marida maktabaaha iyo dukaamada buugta
- Wada sameynta filim adoo gujinaya xiriir ka Samee filim ee ku yaal website ka *FUSE* ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Raacida khariirada ama warqad marka bannaanka loo baxayo, oo ay ku jirto akhrinta jadwalka gaadiidka dadweynaha iyo macluumaadka calaamadaha ku yaal goobaha dadweynaha.

## Loolanka Akhriska ee Premier

Loolanka Akhriska ee Premierka waa si weyn oo ay ardeyda Victoria ku hagaajin karaan akhriskooda. Ardeyda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay akhriyaan 15 buug ama ka badan si ay u gaaraan meel la higsanayo. Waxaa sidoo kale ka mid ah fikradaha cinwaanada buugta. Ka jeegaree loolanka Akhriska ee Premier ka **http://www.education.vic.gov.au/prc/default.htm**